De Evenaar

Xarunta ama Meesha qaabilsan dadka dhaqamada kala duwan ee qaba cudurada maskaxda ku dhaca ee Waqooyiga-Nederland

Informayshan ama Warbixin looga talagalay dadka macaamiisha ama kalyantiga ah

Datum: 22-02-2010
Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar

De Evenaar
De Evenaar, meesha dadka ajnebiga dhaqamada kala duwan ee qaba cudurada ku dhaca maskaxda (Psychiatrie), waxay daryeel ah xaga daweynta cudurada ku dhaca madaxa siisaa dadka ajnebiga ah ee dhibaataysan iyagoo weliba dhibaatadaa u sii raacsan tahay khalkhal ama laqabsi la'aan uga timid faraqa u dhexeeya dhaqankoodii iyo kan Nederland. De Evenaar wuxuu ku yaalaa magaalada Beilen isagoo siinaya caawimaad dhamaan dadka ajnrbiga ah caruur iyo cirooleba ee degan Waqooyiga-Nederland.
Warbixintan waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan waxa dadka loogu qabto De Evenaar.

Yaa loogu talagalay De Evenaar?
De Evenaar wuxuu siiyaa daryeel xaga cudurada madaxa ku dhaca dadka ajnebiga ah. Daryeelka de Evenaar waxaa lagu sameeyaa mid la mida daryeelka dadka madax xanuunka qaba ee reer Holland la siiyo kaasoo laakiin loogu talagalay ama la bedelay si uu u daryeelo dadka ka yimid dhaqamo kale.

Daryeelka looga talagalay daaweynta cudurada madaxa ku dhaca maaha mid xalinaya, waafaqsan ama aqoonsan waxyaabaha ay u baahan yihiin ama waxyaabaha ay ka dacwoonayaan dadka ajnebiga ah. Tan waxaa u sabab ah kala duwanaanta astaamaha dhaqamada. Fogaanta uu badanaa keeno kala duwanaanta dhaqanku waa laga gudbi ama talaabsan karaa. Waxayse tani u baahan tahay wakhti dheeraad ah, dan gaar ah in la siiyo, iyo aqoon inay lahaadaan dadka daryeelka bixinaya.

De Evenaar wuxuu kaloo leeyahay aqoon gaar ah iyo khibrad dheer oo lagu daryeelayo dadka ay kusoo dhaceen waxyaabo aad u xunxun ama naxdin badan leh. Dadka ay aad ugu fiican tahay in lagu daryeelo de Evenaar waa badanaa dad ay dhibayaan cabsi, naxdin, hurdo xumo, feker badan, riyooyin xunxun iyo xanuun xaga jirka ah. Dhibaatooyinkaas dartood waxaa soo koobantay nolashoodii caadiga ahayd. Dadka badankooda waxay dareensan yihiin amd aaminsan yihiin in aanay noloshoda maamuli Karin oo ay ka fara baxday.

Waa maxay sida aan kuu daaweynayno ama wax kuugu qabanayno?
Dhakhtarkaaga ama shaqaalaha dadka caawiya ee u shaqeeya GGZ Drenthe ayaa kuu soo kusoo gudbing karo De Evenaar iyagoo nala soo hadla. Markaa adiga ayaan kuu soo diraynaa warqad lagaaga codsanayo inaad noo timaadid si aan kuula yeelano wareysi kooban. Wareysiga waxaa uu dhacayaa iyagoo ay joogaan ama ka qaybgelayaan dhakhtar qaabilsan daaweeynta cudurada maskaxda ama taliye qaabilsan maskax daweeynta iyo hadii loo baahan yahay kalkaaliye qaabilsan daweeynta. Waxaan kaloo u aragnaa inay aad iyo aad muhiim u tahay in faamilkaaga ama dad kale oo aad ku kalsoon tahay ay iyana kazoo qaybgalaan wareysigan kooban. Hadii loo baahan yahay waxaa la balaminayaa turjubaan kuu turjuma. Wareysigan hore ee kooban waxaa loogu talagaly inaynu is barano, ogaano ana fahano waxyaabaha ama dhibaatooyinka aad tabanayso ama xanuunada ku haaya. Natiijada kazoo baxda wareysigan hore ee kooban ayaan markaa arkaynaa oo waxaan kuu sheegaynaa in uu ku caawin karo ama arimaha ku haya wax looga qaban karo ama lagu daaweeyn karo De Evenaar.

Kalyanti kasta waxaa markaa loo dejinayaa ama loo smaynayaa balaan daaweeyn ah. Balaankan ayaa laguugu sheegaya qofka ah dhakhtarkaaga ama qaabilsan daaweeyntaada, ujeedada daaweeynta lagugu sameeynayo iyo teerabiiyada(daaweyn) aad ka qayb qaadanaysid.

Datum: 22-02-2010
Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar

Siyaabo kala duwan ayaa dadka loogu daaweeyaa de Evenaar.

Daaweyn shakhsi ahaan ama gaar ah
Daaweeyntani waa mid adiga kuu gaar ah taasoo aad marar badan la hadlaysid dhakhtar qaabilsan daaweeynta cudurada maskaxda ama taliye qaabilsan maskax daweeynta ama kalkaaliye qaabilsan daweeynta. Taas waxaa kuu dheer in daawooyin laguu qori karo.

Waxaa jira ama la suurtogelin karaa daaweyn khaas ah oo loogu talo galay caruurta iyo dhalinyarada.
Hadii ay dhacdo ama jirto in dad badan oo isku qoys ahi ay jiran yihiin iyagoo qaba ama ka cabanaya maskaxda ama cudurada madaxa waxaan la shaqeyn karnaa qofka qoyskaas qaabilsan ee ka socda ama u shaqeeya GGZ Drenthe.
Mararka qaarkood dawo cunid iyo hadal qura laguma daaweeyn karo ama wax loogama qaban karo dhibaatooyinka aad qabtid. Iyadoo markaas adiga lagula tashanayo ayaa la sameeyn karaa waxkaqabasho dheeraad ah oo lagugu daweeyo ama caawiyo. Badanaa waxay kuwani yihiin waxqabasho aan hadal u baahnayn ee wax qabashadu ay muhiim tahay tasso wax la qabanayo. Kuwan markaas ama keligaa ayaa lagu siin karaa ama dad kale ayaad la qaadanaysaa. Tusaale ahaan waxaa ka mida terabiiyada ah Dhaqdhaqaaqa (psychomotorische therapie), ama terabiiyada ah ka shaqeynsiinta madaxa (creatieve therapie) sida sawirida ama riwaayad jilida ama terabiida aad qoyskaaga ama faamilkaaga oo dhan la qaadanaysid (systeemtherapie).

Maalin Daaweeyn
Daaweeynta ugu adag ama culus waa tan qofka lagu rabo in lagu dawweeyo dhibaatooyinkiisa oo dhan laba casho ama labo maalmood. Waxaa kan lagu bilaabaa 8 am 10 wiig oo ah diyaar garow ama isfahmid. Markaas ka dib ayaa waxa la daaweeyaa qayb niman ama rag ah iyo qayb naago ama dumar ah. Daaweeyntani waxay ka kooban tahay qaybo kala duwan oo loogu talo galay am qofka keligiis ama dad badan wuxuuna qaadan karaa ilaa sanad dhan. Daaweeynta labada casho ama maalmood mooye waxaa iyana jira kuwa kale oo iyana markaas kadib soo raaci karo ama lagu xiriirin karo si loo ogaado natiijada la gaaray.

Qaybta waxqabashada
GGZ Drenthe waxay leedahay siyaabo badan ama waxyaalo badan oo la isticmaali karo maalinta la shaqeeynayo ama la qabanayo wixii la rabay in lagau daweeyo ama dhibaatooyinka ku hayo lagu xaliyo. Kuwan waxaa loogu talagalay dadka kalyantiha ah. Qaybaha ay leedahay waxaa ka mida meel dhirta lagu beero oo laga shaqeyn karo, meel baaskiilda ama bushkuleetiyada lagu sameeyo, ee meel dadka oo dhan ka dhexaysa oo tolida dharka ama googooynta alwaaxyada loogu talagalay.

Warbixin dheeraad ah
Hadii aad warbixinta sare awgeed su'aalo qabtid waxaad markaas lasoo xiriiri kartaa de Evenaar oo telefoonkoodu yahay (0593) 53 58 42.

Datum: 22-02-2010
Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar

GGZ Drenthe
De Evenaar
Centrum voor Transculturele Psychiatrie
Altingerweg 1
9411 RA Beilen
Postbus 30000
9410 RA Beilen
Telefoon (0593) 53 58 42
Fax (0593) 53 58 51
E-mail: deevenaar@ggzdrenthe.nl

De Evenaar wuxuu ku yaalaa daarta ama sarta de Weijerd. Macaamiisha ama kalyantiga imanaya marka ugu horeeysa waa inay iska soo qoraan ama iska soo xaadiriyaan sekrataariyada xaafiska halka laga soo galo sarta ku dhegan ee la yiraahdo de Etstoel fadhida.

www.ggzdrenthe.nl

Wat doet GGZ Drenthe? Maxay qabataa GGZ Drenthe?

GGZ Drenthe waxay siisaa ama bixisaa caawimaad xaga caafimadka madaxa ah oo ay ka mid yihiin in lagugu daweeyo meeshooda ama qof laguu soo diro ama meelo kale laguu gudbiyo. Daaweeynta arimaha madaxa waxay ka bixiyaan 3 meelood ama qaybood oo wadanka ku kala yala oo kala ah: Noord-Drenthe, Zuidoost-Drenthe en Zuidwest-Drenthe.
Daarnaast biedt GGZ Drenthe klinische en ambulante forensische psychiatrie.

Xanaaneynta iyo daryeelka dad waaweyn waxaa lagu bixiyaa ama laga bixiyaa 2 ah aqalada dadka waaweyn lagu xanaaneeyo (kuwa laysku daweeyo) iyo laba aqal oo dadka waaweyn lagu hayo (kuwa lagu nool yahay) ama daryeelo.

Ka hortegida, caawimaadka xaga bulshada iyo caawimaadka xaga caafimaadku waxay ka mid yihiin arimaha muhiimka ah ee ay GGZ Drenthe. GGZ Drenthe waxay kaloo bixisaa waxbarasho ama tababaro aad u badan sida tababarida dhakhtarka cudurada madaxa(psychiater), taliyaha caafimaadka (gezondheidszorgpsycholoog), taliyaha isdaaweynta (klinisch psycholoog), kalkaalisada caafimaadka (verpleegkundige) iyo daryeelayaal.

Bij GGZ Drenthe waxaa ka shaqeeya ilaa 3000 oo qof, oo loo kala qaybiyay xafiisyadeeda ama laamaheeda kuwaas oo aad u badan oo ku yaala Drenthe. Sanadkasta waxaa caawimaad na soo waydiista in ka badan 15000 oo qof.

© 2006 GGZ Drenthe, Assen, NL. ZW.023P (11/06)
De auteursrechten van alle tekst- en beeldmateriaal in deze uitgave berusten bij GGZ Drenthe en zijn wettelijk beschermd. Gehele of gedeeltelijke overname, in welke vorm dan ook, is alléén toegestaan na voorafgaande schriftelijke toestemming van GGZ Drenthe. Neem hierover contact op met de afdeling Communicatie.

Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar